
# Robinson Kuruusow




Maliinkii kowaad ee Bandhigga Buugagga Boorama—kalkii 4aad—oo laba maalinka hor ka dhacay Rays Hotel, Boorama, casar gaabtiisii ayaa aniga oo dhex lugaynaya barxadda hotel-ka oo kutubta lagu gadayay, ayuun baan si kedis ah u soo dul istaagay miiskii ay ***Hiil Press*** ku gadaysay buugta, saa intaa indhaha la raacraacay kutubtii boqollaalka ahayd ee miisaska dul wadhnaa ayuun baan degdeg ugu hakaday sheekadan kor sawirkeedu idiinka muuqdo ee ***"Robinson Kuruusow."*** Waa sheeko aan muuquuda iyo maqalkeedu midna igu cusbay oo aan ka war qabay, keliya in aan kala furo oo isu eego wixii la iiga sheegi jiray in ay ku sheeggan tahay iyo in kale uun baa ii dhinnayd. Hal nuskho ayaan ka soo qaatay oo inta aan koob kofee ah u dalbaday ayaan akhriskeeda bilaabay. Wax aan wadaba waxa aan is-arkay aniga oo saddex meeloodoo meel dhammeeyey, salaadii markhibna soo gasahay, dabadeed waan u yar hakaday oo hawle kalena ku dhex waday, wax aan miishmiishtaba waxa aan kaga bogtay maalin iyo badh, waxaanan nafta wacad kula galay in aan faallo kooban oo akhriste ka sameeyo. Waa tan hoose e, akhris wacan.

Markii ugu horraysay ee uu ***Daniel Defoe*** sheekadana ***"Robinson Crusoe"*** ifka u soo saaro waxa laga joogaa waxa ka badan saddex qarni, waxa loo turjumay afaf badan oo waxa laga sameeyey masraxiyado iyo filimaan door ah, facba fac buu u soo gudbiyey ilaa uu innagana ina soo gaadhsiiyey ***Axmed F. Cali "Idaajaa"*** oo afartan sano ka hor Soomaaliyeynta sheekadan ku soo saaray wargayskii "Xiddigta Ogtoobar" la odhan jiray, kaas oo lahaa barnaamish loo yaqaano "Taxanaha Xiddigta", kaas oo si bille ah uga soo bixi jiray Muqdisho. Daabacaaddii ugu horraysay oo ***1da AGOOSTO 1980*** (waa sida ay daabacaaddii koowaad ee buugga ugu taalay e) soo baxday waxa xigaya, daabacaaddan labaad oo ay 2022 soo saartay Hiil Press, dib-u-qoristeeda iyo tifaftirkeedana leeyahay ***Cabdiraxmaan Yuusuf***, taas oo qayb ka aha isla taxane la dhaho ***"Dib U Curasho"*** oo ay Hiil Press ugu talo gashay in ay ku soo noolayso buugtii waagii kacaanka la daabacay hadda se dabargo'ay, ama buug kasta oo kal hore soo baxay hadda se suuqa ka dhammaaday.

* * *

Inta aynaan u gelin khilaaf la sheego in uu sheekadan meel-ka-soo-jeedkeeda ku gadaaman yahay, iyo ciddii asal ahaan iska lahayd, bal aynnu yar korkaxaadino nuxurka sheekadan, casharrada ku jira iyo farriinta ugu danbaysa ee aan isleeyahay way gudbinaysaa.

Robinson oo ah guridanbayska reerkood ayay kaga dhegaysaa in uu qoyskooda ka suudalo oo raadsado nolosha dalkiisii Gaana mid ka qaayo badan oo naftisana ku doojiyo reerkoodana ku soo daryeelo, go'aankaas marar badan buu aabbihii kaga baajiyey, "Duco iyo habaar mid dooro" oo uu isna inta uu duco doortay iska iimaansaday dalkiisii. Hayeeshee dareenkaa dhoofku muddo badan buu ku likaysnaa oo had iyo goor duunka ka diyaar buu ahaa, wax se uu xeerinayo ayaa marba baajinayay oo hooyadii u wayn tahay. Muddo waxa uu ka labalabayntaa ku jiray waxa aakhirkii soo ritay Robinson jacaylkii uu dalxiiska u qabay, oo waxa uu go'aansaday in uu socdaalo iskuna hubeeyey meerisyadii ahaa, "Ragga socodku waa u door, haddii mawdku daayo."

Markab shaaximan ayuu Robinson isaga oo aan oggolaanshaha waalidkii hasan raacayaa oo badwayntaa beerka dhigayaa, muddo ayayna badda ku jirayaan oo baabba' iyo balanbal adduun u dhammaanayaa, wuxuuna dhawr jeer temaninayaa in mar uun Alle la baxsado oo beladkiisii lagu celiyo. Waagii hore diyaarad lagu safraa ma jirin, keliya labada marin ee kala ah badda iyo berriga ayay dadku adeegsan jireen, Robinsona labadaaba waa adeegsaday oo waxa uu si kasta ugu badbaaday in loogu maahmaaho, "Nimaan dhul marin dhaayo ma leh." Hayeeshee Robinson dhul oo keliya ma marin e, dhul iyo badba waa maray oo baro ayuu dhaafiyeyba.

Markabkii uu ku soo safray oo Landhana u jeeday, ayaa boqol jiho oo kale la aaday. Ugu horrayntiiba waxa uu ka nabad geli waayay hirarkii, maayaddii iyo mawjadihii badda kacsanaa, kuwaas oo meel daran iyo daadays kala dhacay. Ma qarqoomin oo sidaa kuma qudhbaxin, laakiin jidgooyo ayaa loo galay oo waa la qafaashay. Saa silic adduun baa u dhammaaday oo dirqi iyo tu baas buu kaga soo badbaaday, dabadeed Baraasiil buu baxsad ku soo galay oo inta uu halkaa beer qasab ah ku beertay ayuu haddana ka dhaqaajiyey oo baayacmushtar iyo wax badso kale badda cagta saaray. Mar kale ayay la soo deristay masiibo iyo silicmardaad aan kii hore ka yarayn, markabkii uu soo raacay oo u shiraaqnaa halkaa iyo Landhan oo ani jinis saarnaayeen baa badhtanka biyaha kula qarqoomay, wixii dad la socday oo dhan baa ku la'day oo isaga uun baa ka bedbaaday, naflacaarigiina huudhi yar inta uu soo cuskaday ayuu ku yimi xeebta iyo gasiirad lamadegaan waaqla ah, taas oo ashahaate iyo ma-ashahaate toonna aanu joogin. Waxa uu u garaabay taladii waalidkii oo waxa uu naftiisa ku canaantay dhega adkaantii iyo macangagnnimadii qaadday ee saacaddaa halka uu wadhan yahay dhigtay, waxa uu nafta kula faqay hadalkan hoose oo buugga ku qoran:
Waxa uu had iyo goor isku la faqi jiray, hadal sidan hoose buugga ugu qoran:

**"Waxaan ka yaabay sababta ay isugu kay dhejinayeen ee u jeclaadeen in aan la joogo. Xilligaas ma aanan garanayn waxa ay waayuhu ii qarinayeen oo dhibaato iyo balanbal ah."**

Waxa uu bilowgii horeba ku halaanhalay heelladii Cumar Dhuulle oo waxa uu hoos u yidhi, "Weheey waaqlaan u baxayoo, cidlaan weehaabayaa." Calaacal, qoomamo, isciilkaanbi iyo shawr badan ka dib, waxa uu go'aansaday inuu waayaha la gaylamo oo, "Sirtu waa ka dhigashada/marka aan si kale jirin" waa tii Hadraawi yidhi e, in uu ka dhigto jasiitradda Landhantii uu rabay, oo samir iyo karti guntado.

Bilowgii horeba waxa uu sahamiyey meel uu ka dago jasiiraddan, waxa uu uga sii gudbay wax uu cuno, meel uu seexdo iyo guri uu negi ku noqdo, tan iyi inta shil kale oo waayeed meeshan ka kaxeenayo ama ku allaysanayo. Robinson waxa uu la soo baxay awood yaab leh, taas oo dedaal badan ka dib ina tusaysa nin jasiiraddii aan cidi ku noolayn xoolo ku dhaqday, beer ka samaystay, saaxiibbo ey, bisad iyo orgi ka mid yihiin ku yeeshay, iyo, ugu danbay, boqor bannaan degay oo dad martiyeen isna marti sooray; cadaw ka dhiciyey; meel dejiyay; macallin u noqday oo af, farsamo iyo aqoon kaleba baray. Eyga aynnu soo sheegnayn waxa uu ahaa saaxiibkiisa ugu qaalisan, kaas oo uu ku sifeeyey sidan hoose: “Hab kastaba dadkuu kala mid yahay, hadalka mooyaane.” Taas oo uu islahaa waxa aad ku gudatay waajibkii madxi ee eygaagu kaa mudnaa, cakuye si kasta oo ay dadka xunxuni u badan yihiin, haddana, dadkaa uu ku sifaynayo Robinson eygiisa waa dadka xaruuriga u aha sida Robinso.

Waxaas oo dhani waxa ay dhacayaa lix iyo labaatan sano oo uu jasiiraddaa ku noolaa, taas oo uu aakhirika kaga tegayo dad uu ku beeray iyo barwaaqo uu u sababay.

Wax uu socda, wax uu socda aakhirka waa ka soo baxayaa jasiiraddaa oo saxiimad uu samaysto ayuu kaga soo bedbaadayaa oo sidaa ugu soo guryanoqonayaa dalkiisii hooyo ee uu islahaa ku soo noqon maysid oo habaar la aqbalay baa kaga dhacaya; marka se uu foodda soo geliyo ee maalin joogo ayuu ogaanayaa in ay waalidkii beri hore allaysteen, cid kale oo garata oo uu sheeko la guulana waa ka waayayaa, waxa uuna mar kale shafka soo saarayaa doon kale oo u shiraacan xaggaa iyo Lodan, isaga oo aad mooddo in uu ku heesayo, tabtii Mako Maxamed:

**“Lebbiska iyo raaxada**
**Libin uma arkaayee**
**Luunka iyo gaajada**
**Lugta socodka waan bari**

**Lahalmaalay leeleel**
**Ama lumayo lay waa**
**Ama ladhay naftaydoo**
**Ku liibaanay raadcada”**

Tolow safarkan kale ma ku guulaysan doonaa mise badda ayaa liqi? M budhcad badeed baa heli oo inta ay ka qaado ay uu hayn sitaba qoorta u dheerayn? Ma mar kale ayuu markan kale ka badbaadi oo sidii hore oo kale huudhi ama loox uu xoog ku jabsaday jasiirad ku aadi? Tolow miyii nabad tegi Landhan oo heli libintii uu weligii u halgamayayay?

Waydiimahaas iyo qaar kale oo badanba waxa ka jawaabaysa sheekada e, yaanan kaa wada laasan ama kaa dilin xiisaheeda oo dhan e, soo dhammayso, akhriste.

Aan soo ururiyee, sheekada waxa laga la dhex bixi karaa nuxurro iyo falsafado dhowr ah, sida gaylanka nolosha ee kelinnimada, quruxda dabeecadda iyo u fiirsiga abuurka Eebbe ee dhan walba leh, debecsanaanta, geesinnimada, bani’aadantinnimada, maquusashada, dhabar’adaygga, dhiirranaanta, iimaanka, anshaxa, bahalnnimada, is’aaminaadda, saaxiibtinnimada, wax-wada-qaybsiga, daltabyada, ikk.

Ka akhriste iyo faalleeye ahaan haddii la iga warsan lahaa qaybihii ugu mudnaa ee sheekada iga cajabiyey, inta aanay su'aashaasi dhulkaba u dhicin waxa aan ku jawaabi lahaa, afar qaybood.

- Qaybaha ka sheekaynaya sidii uu Robinson dhexda ugu xidhay in uu xabsigan wayn ee waayhu ku xukumay keligii sidii uu uga dhigan lahaa, boqortooyo uu boqorkeeda yahay oo xorriyad buuxda uu ku haysto, taas oo uu in badan ku naalooday oo ku noolaaday. Waxa fejec leh sida ay sheekadan iyo tii Hadraawi ee jeelka Qansax-dheere wax u wadaagaan, iyo sida ay labadooduba u fahmeen waaqacii ay ku qasbanaayeen noloshiisa, ugana dhigan lahaayeen Firdawsadii ifka, kuna gaadhnaan lahaayeen meerisyadii Hadraawi ee ahaa:

**"Nin demeero soo horay**
**Yaa yidhi denbuu galay**
**Billay duunyadiis tahay."**

Ama meerisyadiisii kale ee ahaa:

**"Marka aad Duleedoow**
**Sidaad doonto waydaad**
**Sidaad diidday yeeshaa."**

Haa, markii ay waayeen siday doonayeen oo ah in ay ku nayaayiraan nolol milgo leh oo ay ku baadigoobaan jiritaankooda iyo halka uu ahaanshahoodu yaallo, ayay yeeleen sidii ay diiddanaayeen oo ah nolol shil ah oo sagaashankaba geeddi la yahay, taas oo aanu qofku garanayn in uu lamadega ku gurya furan doono ama se guryasama. Taasi waxa ay gayaysiisay labadoodiiba (Robinson iyo Hadraawiba) in ay jeelkaa iyo jasiiraddaa dhexdiisa ku beeri lahaayeen qamandi, sarreen, gallay, iyo bariis. Sidoo kale uu midna digaag dhaqday ka kalena uu riyo iyo orgi taransaday.

- Waxa kale oo xoog ii soo jiitay, sida ay sheekadu u sawirayso fasirka ay dadka ka bixiyaan walxa aanay garanayn iyo sida ay macne khiyaal ah oo ay madaxooda ka keeneen ugu jalbeebaan. Bilmetel, galti ama madaxkuti mar ku soo xidhanaysa gasiiradda uu Robinson ku noolyahay, wadatana laba qof oo ay soo af-duubteen, ayaa iyaga oo cuna is leh oo dab ku hogaysanaya ayuu Robinson xabbad ku ridayaa oo inta ay argagaax qaylo ku dhufanayaan oo u yaacayaan halkii doonidoodu taallay, dabadeed dib u jeeraarinayaan oo xiin ku aadayaan halkii ay ka yimaaddeen. Xoogaa ka dib ayuu nin la noolaa Robinson u imanayaa oo u sheegayaa in galtidaasi aanay dib u soo noqonayn oo xabbadahaa ay ku rideen ku sababeen baqo iyo baasaysi ah inaanay weligood halkan ku soo laaban. Robinson ayaa sababta waydiinaya ninka, dabadeed waxa uu ugu jawaabayaa:

"Rasaastii hugunkeedii ayay la waasheen ehelkoodii iyo saaxiibbadoodna waxa ay uga sheekayn doonaan danabkii cirka kaga soo dhacay [rasaastii ayuu u jeedaa e] iyo onkodkii jaalleyaashoodii qaar ka mid ah nafta ka qaaday. Qaar iyagii ka mid ah ayaan maqlayey markay baxsanayeen iyagoo sheekaynaya oo ka fejacsan belaayadii la soo deristay. Waxaa ka dhaadhici weyaday awoodda ay

colkoodu leeyihiin iyo sida ay ugu suura gashay in ay meel fog kala diriraan oo duufaanno iyo onkodyo halis ah ku sallidaan, si fududna u mariyaan.”

Orgobyadaa iyo dad-qalatadaasi waxa ay u qaadatay rasaastii iyo tacsiirtii ay Robinson iyo saaxiibbadii ku fureen in ay tahay, onkod iyo duufaanno jin oo shayaadiin darawalinayaan, kuwaas oo ka danbeeyay in ay dadkan madhiyaan, awood aanay maskaxdoodu sawiran karina ay gamta u joogsatay. Sidaas ayay ehelkoodii iyo asxaabtoodii ugu sheekeeyeen, taas oo suure ah in ay noqoto been jiilba jiil kale ka dhaxlo oo hadhow ku biyashubata aaminaadda iyo hiddaha bulsheed, kaga mid noqoto dhaqanka umaddaas. Waa shaacsane aynnu fahmi karno hadda, laakiin qoraaga sheekadu saddex qarni ka hor si farshaxamaysan tolkii ugu laqimayay in ay waxani tahay huuhaa hiddaha ka qayb noqotay. Kumannaan iyo kumannaan sheeko oo noocaas oo midhan ah ayaa dhaqannada bulshooyinka laga soo helayaa, kuwaas oo si aqoondarro hadhaysan loogu arooriyo diinta iyo aaminaadda bulsho. Haddii se aad loo fadho oo si wayn loogu fiirfiirsado noqon karta khuraafaad la ismoodsiiyay iyo fasir been ah oo la kala dhaxlay, kaas oo si fudud loo burin karo.

- Inta aad sheekada akhrinayso waxa aad ka baranaysaa erayo iyo jumlado aad u badan oo Soomaali dhalad ah, kuwaas oo ku ogog leh beerfalasha, qaar kale oo ugaarsiga iyo dabashada ku saabsan, kuwa kale oo badmareennimada iyo tabaabulshaha safarrada ku saabsan, iyo, ugu danbayn, qaar ku saabsan dhaqashada xoolaha iyo isdhexgalka dhaqannada.
- Ugu danbayn waxa aanan ka tegi karayn hummaag ka mid ah hummaagyada ay sheekadu tebinayso oo ah qiimiga ay leedahay saaxiibtinnimadu, iyo suda aanay wehel la’aan noloshu u wacnaanay ee ay u tahay gudcur soo afyeeshay. Waxa aynnu sheekada ku dhex baranaynaa wiil yar oo uu mar Robinso ka badbaadinayo Galti is leh dubta oo dejiya, oo uu u bixinayo “Jimce”—maalintii uu bedbaadiyay oo jimce ahayd ayuu ugu magac daray e. Gabankaasi sida uu gobta iyo gacalka ugu noqonayo badbaadshiyiisa iyo boqorkiisa ayaa hummaag yaab leh oo aan la hilmaami karin ah. Taasi waxa sii xoojisay aragtidii wacanayd aan saaxiibtinnimada ka haystay, oo waxa ay sii hagaajisay yuhuuntii aan u qabay in aan mar uun saaxiibtinnimada malkaddeeda, maqaalna Alle ha ka yeelee, wax ka qor.

Gebagebadii, waxsoosaar kastaa waxa uu leeyahay ammaan iyo dhaliil aan badi ka la hadhin oo wada socda, kuwaas oo ay tahay in isku si loo sheego ama marmarka qaar la kala badsadaba; marka buug la faalleenayana waa ka sii xagjirtaa oo muhiim bay tahay in labadaa shay dhugmo dheer loo yeesho. Anigu se buugyarahan 155 bog ah ee A5 ah, ammaanta aan u hayo ayaa kun iyo kaakac jeer dhaliisha iyo dhaleecada aan u hayo. Waa buug si fiican loo turjumay, loo tifaftiray oo loo qaabeeyey. Xil baa la iska saaray sidii xaqiisa loo marin lahaa ayaan odhan karaa, haddii laga tegi waayana waxa aan carrabaabi karaa khaladaad yaryar oo madbici ah iyo kuwa kale oo la gef qoray. Waxa aynnu tusaalayaal u soo qaaadan karnaa arrimahaas, erayadan hoose:

Sida Qoran

1. “**Uddo** dheer buu aabbahay…” **b. 18aad**.
2. “Eraygaasi wuxuu dhabtii ahaa **Kuhaan** run ah iyo habaar la aqbalay..” **b.18aad.**
3. “Naakhuudihii tuugta ayaa **shaqadaygii** u bogey..” **b. 36aad.**

4. "Waxa igu soo dhacday in aan habeennimadii u baxo si aan u ogaado halka aan dunida **aan dunida** ka joogo.." **b. 38aad.**
5. "..amakaag baa **ifu** dhacay.." **b. 55aad.**
6. "… taas oo ahayd in aan doonta si degdeg ah uga **taa tago** oo aan ka soo qaato waxyaalaha ugu waawayen ee aan u baahnahay.." **b. 56aad.**
7. "… mana jirin wax raaxadayda iga kala dhantaalayay oo aan ahayn fogaanta jasiiradda iyo **wheel** la'aanteeda.." **b.104aad.**
8. "Saacad barkeed ma uu **hurdinmarkuu** baraarugay.." **b.119.**
9. "Maalin maalmaha ka mid ah aniga iyo "Jimce" oo **kaymahaqaarkood**..." **b.120aad.**
10. "Waxaan u ballan qaaday rejadii uu ku **taahayay**..." oo aan u badinayo in uu ka waday "**taamayay**." **b. 127aad.**

*** * ***

Muranka ku jira meel-ka-soo-jeedka sheekadan: Ibnu Dufayl iyo Daniel kee leh?




Midig, sawirka jaldiga hore ee buugga **Daniel**. Bidix, sawirka jaldiga hor ee buugga **Ibnu Dufayli.** X/S waxa iska leh, **مدونات الجزيرة .**

Sida uu Cimraan Cabdillaahi kaga faallooday wargayska Mudawinaat ee al-Jazeera waxa jira loollan mar hore soo bilaabmay oo ka dhex aloosan Muslimiin Carab ah iyo Gaalo reer Galbeed ah, kaas oo ku dhisan in ay is-bililiqaysteen. Tuhunkaa isku tuurtuurka ah ayay tanina ka mid tahay oo siraaca iyo isjiidjiidka dhaqaneed ama dhaxaleed waa mid in badan ka dhexeeyey labadaa qolo, kaas oo meelo dhowr ah taabtay, sida sayniska, suugaanta, siyaasadda, falsafadda iyo culuunta kale ee mid bulsheed iyo mid sooyaaleedba leh. Taas uun bay tanna ka mid tahay oo ku arooraysaa, sida ay afkaar iyo aqoonba u kala dhaceen ayuun bay suugaan iyo falsafadna u kala xadeen, oo waxa uu Cimraan ku doodayaa in faylasuufkaa iyo digtoorkaa Ibnu Dufayl (1185–1100) ee reer Andaluus uu sheekadaa "Xay bin Yaqdaan, حي بن يقظان" qoray waqti ku

siman qarnigii koowaad, halka suugaanyahanka iyo hantiilaha reer Iglan ee Daniel Defoe (1660–1731) uu sheekadan qoray, ugu yaraan nus qarni ka dib markii uu Ibnu Dufayli sii mootanaa.

Labada sheeko wax badan bay wadaagaan, oo haddii aynnu qadhiidh yar ka sheegno tan Ibnu Dufaylina (oo lafteeda muran badan ku jiro ciddii asal ahaan lahayd inuu yahay ninka aynnu soo sheegnayn iyo in kale, taas oo marmar loo nisbeeyo in uu faylasuufkii Ibnu Siinaa lahaa, qorayna xilligii uu jeelka ku jiray), waxa annu ku soo gaabsan karnaa in sheekadan “Xay bin Yqdaan” ku saabsan tahay wiil yar oo Xay la dhaho, kaas oo keligii ku barbaaraya gasiirad laga guuray, adeegsanaya caqligiisa iyo dareennadiisa si uu u fahmo caalamka ku weegaarsan, waxa uu daahfurayaa xeerer xerudhalan ah oo uu dabeecadda ku fahmo, aragtiyaha asalka kawnka ku salaysan iyo horumarka anshaxeed iyo xidhiidhka akhlaaqeed ee uu xoolaha iyo dhirta la leehayay, ayuu maangalnimadaa xaruuriga ah iyo aaminaadihiisa fiican u adeegsanayaa si uu u la dhaqnaado.

Labada sheeko midna si wayn diintu uga ma laha kaalin muuqata oo aynnu ku gorgortami karno, aan ka ahayn inta raxmadda, anshaxa suubban, iyo damiirka. Bal e, sheekada Ibnu Dufayli waxa ay ina tusinaysaa mar uu wiilka yari booqanayo magaalo diimeed ay mutadayiniin joogaan, dabadeed uu la yaabayo dhaqamadooda foosha xun ee xanta leh, beenta leh, ee xumuha kale fara badan hadheeyey; markaasuu ka soo cararayaa intya ay munaafaq iyo uur-ka-gaal ku sheegaan, dabadeed inta uu jasiiraddiisa ku soo noqdo ayuu qudhiisa u jidaynayaa marin suubban oo ay ifka ku bedbaaddo.

Labada sheekaba waxa ay ka simayn yihiin dedaalka ay u gelayaan in ay caqliga iyo diinta iswaafajiyaan oo meel isugu keenaan, saa waxa aad mooddaaba in ay ku tacalluqdo falsafaddii reer Andalus ee qarnigii 12aad, taas oo ka duuli jirtay in xaqiiqada lagu gaadhi karo garashada oo looga dhinbiil qaadanayo caqliga, oo waxa ay goob isugu keenaysaa falsafadihii Ibnu Rushdi, tii Faaraabi, ti Ibnu Baajaha, tii Qazaali iyo tii Aristootal.



Waa sawir koobsanaya labada qoraa ee u badan ee sheekadan loo nisbeeyo: **Daniel Defoe** iyo **Ibnu Dufayl**. X/S waxa iska leh **Arsh Raziuddin**.

W/Q **Ibraahin Ayman**